# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### Golihii 5aad Kal-fadhigii 11aad, Fadhigii 6aad

**21 April 2025**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Gudoomiye Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Wax ka badelka Xeerka Socdaalka.

**Md: Abubakar Siciid Cali (11min, 23 sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiyaha iyo Mudanayasha waan salaamayaa, bacda salaan Xeerkan Socdaalka.

**Qodobka 2aad ee Eray-bixinta, waxaan ku soo darayaa labada Eray-bixinood ee kala ah:-**

- **Fooljarigarayn**:- waxa looga jeedaa Sameynta ama beddelidda wax (sida waraaqo, dukumenti, calaamado, aqoonsiyo iwm) si been ah, iyadoo loo ekaysiinayo inay yihiin kuwo dhab ah ama sharci ah, si loogu helo faa'iido aan xaq ahayn,

- **Deganaansho:- Waxa looga jeedaa** ruqsad qof la siiyo si uu si sharci ah ugu noolaado gudaha Somaliland.

**Qodobka 3aad** ee Xadka Adeegsiga Xeerka (Scope of application) **Farqada 2aad** waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo sidan "Cid kasta oo xeerku xaq u siiyay in lagu dabaqo ama qayb ka **ah** fulinta xeerkan.

**Qodobka 4aad ee Ujeedooyinka Xeerka,** waxan soo jeedinayaa in **farqada 1aad** ee qodabkan laga dhigo "**Si loo ilaaliyo madaxbanaanida iyo amaanka qaranka Somaliland**", farqadani waa mid leh micno siyaasadeed, sharciyeed, iyo mid dhaqan-dhowr leh, sababtoo ah Marka xeerka la akhriyo, qodobka ujeeddooyinka ayaa ah meesha ugu horreysa ee la eego.

Faa'idada ay leedahayna waa Markay arkaan in xeerku diiradda saarayo madaxbannaani iyo amni, waxay kordhinaysaa kalsoonida lagu qabo in Somaliland leedahay nidaam sharci oo ilaalin kara ganacsi, maalgashi, iyo iskaashi caalami ah, sidaa darteed qodobkani wuxu xoojinayaa suurtogalnimada in xeerka lagu ixtiraamo gudaha iyo dibaddaba, waxayna siisaa hay'adaha fulinta sharci iyo awood buuxda oo ay ku gutaan

waajibaadkooda.

**Isla Qodobkaas Ujeedada Farqadiisa 6aad** waxaan u dhigi lahaa in loo badelo **"in la helo xeer ilaalinaya waajibaadka saaran dadka ajaanibta ah dalka ku nool"** si uu xeerkani u noqdo mid u qeexaya ajaanibta dalka joogta aan loo dhaqmi doonin si takoor ah, isla mar ahaantaana uu xeerku noqdo mid la jaanqaadaa mabaadi'da caalamiga ah. oo dadka ajnabiga ahi ay ogaadaan inuu jiro sharci damaanad siinaya xuquuqdooda iyo in la aqoonsanayo waajibaadkooda.

Waxa kale oo aan soo jeedinaya in lagu daro **FARQAD CUSUB** oo ka hadlay **xuquuqda**, taas oo u dhigan sidan "**in la helo xeer ilaalinaya xuquuqda iyo waajibaadka saaran dadka ajaanibta ah dalka ku nool"**

**Qodobka 37aad Imaatinka iyo Joogitaanka Dalka ee Ajaanibta, Farqada 2aad** Qof kasta oo dalka soo galaya ama ka baxaya waxa ku waajib ah inuu soo horjoogsado sarkaalka socdaalka, si uu waraysto una hubiyo **documents** kiisa. in afsoomaali loo qoro lagana dhigo **dukumentigiisa**

**Qodobka 38aad ee Awoodda Oggolaanshaha iyo Diidmadda Soo Gelidda Dalka Farqada 3aad xarafka A** ee u dhigan sidan "Baasaaboor Ansax ah ama Dukumenti Socdaal oo u dhigma oo haysta Dukumenti uu ku qoran yahay Magaciisu oo Sax ah oo la siiyay isaga. Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan **"Inuu haysto baasaaboor Ansax ah ama Dukumenti Socdaal oo u dhigma oo haysta Dukumentii uu ku qoran yahay Magacii Saxda ah ee isla shakhsiga sita:**

Waxa kale oo Qodobkaas ku soo dari lahaa **Farqad 4aad** oo cusub una dhigan sidan **"Waxa kaloo soo gali kara shakhsi ka socda dalalka laga dhaafo fiisaha hadii ay jiro heshiis.**

**Qodobka 39aad ee Noocyadda Oggolaanshaha Soo Gelidda** waxa la soo jeediyay in qodobkani iyo farqadihiisu aanay si fiican u sharaxay nooca imaatinka loo ogolaan karo inay dalka soo galaan waxaana la soo jeediyay in sidan dib loogu habeeyo.
"**Noocyada Imaatinka ee la oggol yahay waxa kamid ah:-**
**b. imaatin dalxiis (turismo)**
**T. imaatin shaqo.**
**J. imaatin waxbarasho.**
**X. imaatin caafimaad.**
**kh. imaatin ganacsi.**
**D. imaatin socdaal diimeed. (khuruuj)**
**R. imaatin Jid-marid (Transit)**

S. imaatin Magangalyo Siyaasisadeed, ama Bili'aadantinimo

**Qodobka 48aad Oggolaansho Joogitaan Mudaysan (Temporary Residence) Farqada 1aad** ee u dhigan "Oggolaansho Joogitaan Mudaysan waxa la siin karaa qof kasta oo Ajnebi ah oo soo dalbada haddii aanu kamid ahayn kuwa lagu sheegay **qodobka aad** ee Xeerka" Markaa waxa faahfaahinaya Qodobka 59aad, **Ajaanibta Mamnuuca ka ah Dalka. Waxa** Xaqa Soo gelitaanka iyo Joogitaanka Mudaysan waxa la siin karaa Ajnebi kasta marka laga reebo Ajnebiga Aan la doonayn, waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan haddii uu la yimaado Shuruudahan soo socda, **"Oggolaansho Joogitaan Mudaysan waxa la siin karaa qof kasta oo Ajnebi ah oo soo dalbada haddii aanu kamid ahayn kuwa lagu sheegay qodobka 59aad ee Xeerka**

**Qodobka 49aad ee ka hadlaya Deggenaansho Rasmi ah, Farqada 5aad** halka *da'adda caruurtooda* waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **15 Jir,** halka ay ka tahay **18 Jir**, waxayna noqonaysaa Farqadaasi sidan **"Lamaanaha is-qaba iyo Caruurtooda Ka yar 18 jir ee la nool Ajnebiga la siiyey Oggolaanshaha Degenaanshaha/Joogitaanka Rasmiga ah waxaa lagu dhaqayaa qodobada Xeerka"**

**Qodobka 55aad ee Laalid ama Kala Noqoshada Oggolaanshaha Farqada 3aad** Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **xubnaha dadka** halkaa ay ku qoran tahay xubnaha qofka.

**Qodobka 56aad ee Midaynta Qoyska farqadiisa 2aad** waxaan soo jeedinayaa sida Qodobkii 49aad in halka **da'adda laga dhigo 15 jir** oo la waafajiyo da'dda qaangaadhka ee Diinteena Islaamka.

**Qodobka 63aad ee Dambiyadda La Xidhiidha Arrimaha Socdaalka, Farqada 1aad** ee Dambiyada la xidhiidha arrimaha socdaalka ee ajaanibka, waxan soo jeedinayaa in lagu daro farqad dheeraadka ah oo u dhigan sidan **"inuu qariyo ajanabi sharci daro kusoo galay amaba sharci daro ku jooga dalka".**

**Qodobka 65aad** ee Hannaanka Dhagaysiga Dacwaddaha la xidhiidha Socdaalka waxaan soo jeednayaa in labada farqadood ee Qodobkan in loo dhigo sidan:

1. *Dacwaddaha la xidhiidha arrimaha Socdaalka ee Ajaanibta waxa awood u leh dhagaysigooda Guddi Madaxbannaan oo loogu yeedho Gudiga Dacwadaha Socdaalka.*
2. *Waxa Xeerkan lagu dhisayaa Guddiga dacwadaha socdaalka oo madax-bannaan oo leh awood gaar ah oo sharciyeed.*
3. *Guddigan wuxuu ka kooban yahay:*

*B. Garsoore Sore ama qareen khibrad leh (Guddoomiye)*
*T. Xubin ka socota Wasaaradda Arrimaha Gudaha*
*J. Xubin ka Socota Wasaarada Cadaalada*
*X. Xubin ka socota G/wakiilada*
*Kh. Xubin ka socota Hay'adda Xuquuqda Aadanaha.*

**Md: Cabdilaahi Muuse Cawaale** (5min, 13sec):- Bismilaahi Raxmaani Raxiim Shir-gudoonka iyo xildhibaanada ASC, waxa aan halkaa ku yara dari lahaa **Qodobka 5aad faqaradiisa E** wuxuu sheegayaa in aynu u hugaansano iskaashiga caalamiga ah iyo Hay`adaha socdaalka ee Qaramadda midoobay, maadama oo aynaan ka mid ahayn qaramada midoobay, qaramada midoobayna ay tahay urur lagu jiro oo wata shuruudihiisa sabab aynu u raacno dawaladaha ku heshiiyay waxaan u arkaa arrinkaasi in aanu innaga ina khusayn, markaa waxaan odhan lahaa Qodobkaa iskaashiga caalamiga ah aynu ka saarno.

**Qodobka 6aad** waxaa ku jira in ciidamada socdaalku ay xaaladaha dagaalka ay ka qayb gali karaan difaaca qaranka iyada oo ay sidaa tahay waxa uu sheegayaa oo qoran **Qodobka 15aad** in tababarka la siinayaa uu yahay tababar aasaasi ah, maadaama markay difaaca qaranka ay tahay ay askarta la mid noqonayaan oo ay ka qayb galayaan difaaca qaranka, waxaan odhan lahaa waa in ay qaataan oo la siiyo tababar la mid ah midkay qaataan ciidamada caadiga ahi. Marka **Waxaan soo jeedin lahaa in laga badalo tababar aasaasi ah oo loo badalo Tababar caadi ah.**

**Qodobka 16aad** waxa uu isaguna sheegayaa darajooyinka ciidanka markaa waxaa ku jira Dable iyo Jadiid, **jadiidkaasi waxaan odhan lahaa halaga dhigo askari cusub** ama sidii hore ee la odhan jiray ee ahayd **Dhibooga** intaa loo daayo, laakiin kalmadan Jadiid waa kalmad cusub oo aynaan hore ugu arki jirin in loo bixiyo magacyada ciidamada ama derajooyinka.

**Qodobka 24aad** oo ah Abaalmarinta la siinayo ciidamada oo ay tahay **farqada C** oo ay ku qoran tahay abaal-gud qiimayn hawleed, laakiin waa in la saxaa oo la yidhaahdaa Aabaal-gud qiimayn hawleed maxay tahay, waa in la yidhaahdaa waxaa la siinayaa abaal-gud amaan ah oo af ah ama qoraal ah, abaal-gud lacageed, **markaa waxaa loo baahan yahay in las haraxo Abaal-gud qiimayn hawleed**.

**Qodobka 27aad** waayo aragnimada looga baahan yahay Taliyaha iyo ku xigeenka ciidanka, waxay yidhaahdeen waa in uu noqdaa 20 sannadood. **Waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo 10 sanadood waayo aragnimada,** maadama oo qofka la qaadanayo

ay da`diisu tahay 40 jir, waxaan odhan lahaa waayo aragnimada ha laga dhigo 10 sannadood, waayo waxaaba laga yaabaa in ay adkaato in la helo qof 20 sanno oo waayo aragnimo leh.

**Qodobka 32**aad dhamaan hubka, qoryaha iyo rasaasta lagu qarameeyo ama lagu diiwaan galiyo xubin ciidanka socdaalka ah waxay noqonaysaa hub ciidan, dibna loogu celin maayo hadii ay ka tagto ama laga eryo, maadaama aan qoriga la siin markii hore ee uu isagu keensaday, waxa uu xaq u leeyahay in loo celiyo Markaa **waa in halkaa laga badalo in aan qorigiisa la siin laguna bedlo in qorigiisa la siiyo** maadaama uu shaqadii ka tagay.

**Qodobka 39**aad Noocyadda oggolaanshaha soo gelida A. Imaatin Rasmi ah b. Imaatin Aan Rasmi ahayn (ku meel gaadh ah oo leh mudo cayiman) **waxaan ku dari lahaa waa in la eegaa danbigiisa iyo wadanka uu ka yimi,** oo baadhitaan lagu sameeyaa inta aanu wadanka iman inuu danbi leeyahay iyo in kale.

**Qodobka 41**aad oggolaansho u imaatin Dalxiis waxaan ku dari lahaa **Farqada 5aad** oo ah in qofka dalxiiska u imanayaa inuu sito lacag ku filan, oo la eego muddada uu joogayo inuu haysto wax ku filan, waayo waxaa laga yaabaa inuu yimaado isaga oo aan lacag ku filan haysan sida iminkaba dhacda, sida kuwa masaajidada ka kaca ee leh safar baan meesha ku yimi dabadeedna lacagtii baa iga go`day.

**Qodobka 62**aad Degitaanka deg-deg ah qofka shisheeyaha ah ee saaran **sabeeye**, Dayuurad, Baabuur iyo Nooc kasta oo ka mid ah gaadiidka, **markaa afkeena kuma** jiro ee waa in la yidhaahdaa **Gaadiidka Bada, Gaadiidka cirka iyo Gaadiidka dhulka** oo intaa loo qaybiyaa.

**Md: Faysal Yuusuf Jaamac** (4min, 1sec): - Bismilaahi, Waad mahadsan tahay Gudoomiye, waxaa fiican marka aynu xeer ka doodayno in xeerka ay secondmentgareeyaan seddex xildhibaan iyo wixii ka badan la badalo oo sidaa xildhibaanadu isku raaceen loo badalo waxaad moodaa innagu xeerka waynu ka doodnaa, laakiin marka dambe waxaad arkaysaa isaga oo sidiisii u qoran oo dooddii iyo hadalkii xildhibaanada aan waxba lagaga soo darin, markaa taas waan xoojin lahaa.

Hadaan bilaabo Dooddayda ma badna laba sedex Qodob ayaan ka hadlayaa, qodob waxa weeyaan marka farqadiisa la sheego waxaa ka sii farcamaya qaybo, markaa meelaha qaar waxaa ku qoran A,B,C,D oo English ah meelana waxaa ku qoran B,T,J oo Somali ah, markaa halkaa waxaan odhan lahaa in lays waafajiyo oo soomaali laga wada

dhigo, B,T,J oo  A,B,C da laga saaro maadama uu xeerku soomaali yahay wayna inagu badan tahay taasi marka xeerarka la soo qorayo, waxaad arkaysaa iyaga oo isku dhex daadsan qaarna B,T,J A,B,C lagu qoray markaa si uu micno u yeesho aynu Afsoomaali ka wada dhigno.

**Qodobka 7aad Faqaradiisa 2aad** waxaa ku qoran waa ladacwayn karaa ciidanka socdaalka iyana wey dacwoon karaan, dacwadaha maamul iyo madani waxaa ka kaalmaynaya xafiiska garyaqaanka guud, markaa ma aha **xafiiska Garyaqaanka guud ee waa xafiiska Garyaqaanka Xukuumada,** halkaa in laga dhigo Garyaqaanka xukuumada ayaan soo jeedin lahaa.

**Qodobka 8aad** Astaanta ciidanka ayuu ka hadlayaa waxa uu ka hadlayaa Dirayska ciidanka socdaalka iyo ilaalada Xuduudaha in **farqad 3aad lagu daro oo X ah**, markaa waxaad moodaa in uu qayaxay dirayskii Ragga oo aanu Dirays Dumar ku darin waayo dumarku wey ka mid noqon karaan ciidankaa, markaa waxaan odhan lahaa in lagu daro **Farqad 3aad** oo dumarka ka tirsan ciidanka socdaalka iyo ilaalada xuduudaha waxay qaadanayaan dhar leh midabada kor lagu soo sheegay oo  asturan oo waafaqsan Shareecada islaamka.

**Qodobka 25aad** oo ah awoodaha iyo waajibaadka Taliyaha ciidanka socdaalka, Taliyuhu waa mas`uulka ugu sareeya hogaaminta iyo maamulka ciidanka socdaalka, waxaana magacaabaya madaxwaynaha si waafaqsan **Qodobka 90aad farqadiisa 5aad** ee Dastuurka JSL, magacaabistu waxay ku qoran tahay **Qodobka 90aad faqradiisa 3aad** ee **ma aha ta 5aad**, waxaan jeclaan lahaa in lasaxo oo farqada 5aad wax kale ayay ka hadlaysaa, oo **farqada 3aad** laga dhigo Taliye xigeenkuna waa la mid.

**Md. Maxamed Xasan Siciid (8min, 44sec): -** Bismilaahi, Anigu waxaan si guud u soo jeedina lahaa qodobadan hoos ku xusan:-

- Ina laga daayo Ciidanka Socdaalka oo laga dhigo **Hay'adda Socdaalka,** Mudane Gudoomiye, Mudanayaal waxaad ka war haysaan inaynu dab-damiskii ka dhignay ciidan tirada ciidamadana waynu badinay, aduunyada wadamo fara badan 'best-practice' waxa la yidhahdaa hay'adda socdaalka, lama yidhaa ciidanka socdalka, waxa dhacda wakhtiyada qaar in dad suuqa laga soo qabto ama ina guryaha la galo oo dad la soo qabto oo la garan waayo ma bilayskii baa xidhay ma immigration kiiba xidhay, magaalooyinka gudahoodana waxa maamula sharciyan amnigooda iyo qabqabashadooda waa ciidanka bilayska, sidaa awgeed, waxaan odhan lahaa hay'addan hay'ad madaniya ha laga dhigo, ha noqoto hay'adda socdaalka.

Hadiise la doonayo ina ciidan laga dhigo waa ina loo badalo Ciidanka socdaalka iyo ilaalinta xuduudaha oo magaca xeerka la badalo, sida ku cad ama ku xusan **Qodobka 6aad** ee xeerkan, magaca ay soo qadatay waxa uu dhigayaa ciidanka socdaalka iyo ilaalinta xuduudaha, taasina waxa ay ka duwan tahay magacii guud xeer ku lahaa, sidaa awgeed, hadii ciidan laga dhigayo hala dhigo ciidanka socdaalka iyo ilaalinta xuduudaha, hadiise loo qadanayo ina ay ciidankii socdaalka yihiin ha laga daayooo ha laga dhigo hay'adda socdaalka.

- Waxa kale oo aan soo jeedinayaa waan ku raac sanahay Mudane Faysal, format ka xeer kani waa xeer soomali ah tirsigiisuna waa inuu noqdaa soomaali.
- Arrinta labaad ee ka hadlayaa oo aan soo jeedinaya waxa weeye, Mudanyaal waxaad ka war haysaan in arrin culus ay tahay arrinta ka ganacsiga Tahriibintu ''Human traffic'' waa Issue aad u weyn, waa issue keentay ama sababtay in hooyooyin badan ay ubadkoodii ku waayaan, waa arrin sababtay in qoysas farabadan ay hantidoodi u xaraashan caruurtoodi oo meel lagu qabtay. Markaa xeerkani si mug leh ha loogu xuso mamnuucida iyo talaaboyinka laga qadayo dadka ku kaca iyo habka loola dagaalamayo tahriibinta iyo ka ganacsiga dadka. Imika marka aad xeerkan u fiirsato kaliya waxa uu ka soo qatay Qodobka 54aad faraqadiisa 5aad iyo Qodobka 76aad farqadiisa 1aad 'c' intaas ayuu ka soo qatay, taana waxaan odhan lahaa hoos ha loogu daadago, hal a mamnuuco oo hala adkeeyo waajibaad ka kowaad ee hay'addan loo aas aassaasay ay tahay la dagalka 'Human traffic'.

Anigoo tixracaya doodda Mudane Xirsi, Xeerka Jinsiga ayaa ka hadla inuu muwaadinka muddo badan soo daganaa uu helayo dhalshada Somaliland, balse qodobo dastuurka ka mid ah ayaa ka hadlaya, sidaa awgeed, si arrintaas isku waa fajino oo arrintii hablaha somaliland in badan ay ka doodayeen dhinacna aynu wax uga qabano, waxaan soo jeedinal ahaa in taa dooda lagu darro Xeerka Jinsiyada, isla markana golahan la horkeeno si wax looga qabto.

**Qodobka 4aad ee xeerkan farqadiisa 3aad** in la helo xayandaab sharci oo sugayasa nidaam ay Somaliland go'aan uga gadhayso dadka ajaanib ka ah ee dalka soo gala ama baxaya ama joogaya, waayo qofkii waxa uu doonaya inuu hello ''visa extantion'' Ka galaya ka baxaya maaha ka joogayana way u xil-saaran tahay in xeerkan lagu xuso.

Saddex farqadoodna waxaan soo jeedin lahaa in lagu darro Qodobka **Qodobka 4aad** Ujeedooyinka xeerka oo ay ka mida tahay (1) ***In la helo xeer lagu ilaalinayo maamulka Basaboorka somalilan***d, waa ujeedoyinka xeerkan waayo xaga hoose ayay ku qoran tahay arrintii Basboorku, (2) **In la helo xeer lagu maamulayo ilaalinta xuduudaha Jahuuriyada Somaliland** waa u jeedooyinka xeerka iyana, (3) **Ina la aassaaso hay'adda socdaalka**, saddexdaas faraqadoodana waxaan soo jeedin lahaa ina lagu darro **Qodobka 4aad ee** ujeedooyinka xeerka.

**Qodobka 6aad** sidaan kor ku soo sheegay waxa ku qoran ciidanka socdaalka iyo ilaalinta xuduudaha, xaga sare ee xeerkana magaciisa waxa ku qoran xeerka socdaalka markaa labadaa ha laysa waafajiyo.

**Noocayada imaanshaha,** mudanayaa jamuuriyada somaliland waxay u bahan tahay inay dhiiri galiso maal gashiga shisheeye, **Qodobada 42aad, 43aad iyo 44aad** waxay ka hadlayaan imaanshaha kala duwan, waxaan soo jeedina lahaa in lagu darro imaanshaha maalgashadayaasha oo visa gaara looga dhigo si loo dhiirigaliyo maalgashiga, imika shaqalaha iyo ardayda iyo dalxiisayaashu way ku qoran yihiin, laakiin maalgashadayaasha si gaara uma xusayo, markaa ahmiyada gaara ah ha la siiyo maalgashadayaasha oo visa gaar ah ha lasiiyi.

**Qodobka 59aad Farqada 3aad (C)** inay xidhaan amar la aan ayaa ku qoran, Immigration-ku markay xadhig sameynayaan waa inay ogaysiiyana bilayska waayo kama hawlgalaan magalooyinka dhexdooda, magalooyinkii ayay wax ka dhex qabanayaan qofkii qof laga xidhana boolisku la xidhiidhaya booliskuna war kama hayno ayay odhanyaan markaana tana halays waa fajiyo.

**Qodobka 80aad Shuruudaha Basboorka Dublamaasiga ah**, Qodobkaa waxaan soo jeedin lahaa ma cadda yaa xaq u leh inay qaataan? sidee loo mamulayaa?, muddada lagu soo celinayaana ma cadda, sidaa awgeed, waxaan **secondment-garaynayaa dooddii Mudane Xirsi** oo ah dadka xaq u leh inay helaan liiskooda xeerka haku qornaado cidii kale ee la siinayaana ha noqoto diidii Madaxweynuhu ogolaanshiyahooda soo bixinayo.

Arrinta labaad, qofku Tittle buu ku qataa baasboorka dublamasiga ah maaha ‘permanent holler’’sidaas awgeed, masuulka baasaboor haystay haduu xilkii ka dhamado siduu u soo celin lahana waa ina lagu cadeeya xeerka, waxaan soo jeedinayaa qof walba baasaboorka service-ka ama dublamasiga qatay in faqarda lagu soo daro halkaas, taas oo ah soo celinta basboorada ku xidhan xilalka iyo shaqooyinka iyo waajibaadka.

**Qodobka 81aad waayida basaboorada ee** dhamaan nooc basaboorada, halkan waxa uu yidhi sitaha baasaboorka somaliland waxa uu ku waayi karaa waxyaabahan, sitaha baasaboorka oo xukun kama dambayas ah oo ay soo saarto maxkamada awood lihi ku dhaco, amarto ina laga noqdo baasaboorkii, in situhu si iskii ah uga noqodo, ina situhu ku dhacay fal dan biyeed khiyaamo qaran ah, halkaa waxaan soo jeedin lahaa ***fal khiyaamo qaran ah oo ay cadayso maxkamada awood u leh isla markaana kala noqoto basboorkii,*** qofkii xukun baa ku dhacaye baasaboorka iyo khiyaamo qaran isma galayso, ilayn xukun baa ku dhacayo qofkii jeel ku jiraaye, xoriyada baa laga qaadayaa basaboorka lagama qadaayo,

Halkaa waxaan ku soo daryaa waayida basaboorka service-ka ah **Qodobkaa 81aad** si cada uma cadeynayo in la yidhahdo qofku marka uu shaqada ka tago baasabookii

service-ka laga qadayaa, qodku marka xil ka tagana baasaborka dublamasiga laga qadayaa oo uu xil dublamasi yadeed ku helay waa laga qadayaa markuu xilka ka dago ama ka dhamaado, Waxa kale oo aan ku dari lahaa liiskii uu soo jeediyay Mudane Xirsi in lagu darro dublamaasiyiinta iyo qoysaskooda, waayo dublamaasiyiinta dalka dibada uga baxaya qoysakiisi waa inuu la qataa basaboorkii uu sitay.

Mudanayaal dooddayada waxaan ku soo gabagabeynayaa qodobkaa ah magaca xeerkan iyo hay'addan nooca ay noqonayso aynu mugwayna u yeelano oo aynu ka dhigno **hay'adda socdaalka** oo aynu ka dayno ciidanka, hadiise ciidanka laga dhigayo waxaan taageersanahay **ciidanka socdaalka iyo ilaalinta xuduudaha** la israaciyo, isla markana uu la xeer noqodo xeerkii ciidamada ee aynu ansixinay xaga darajooyinka. aad iyo aad baad u mahadsan tihiin.

**Md: Xirsi Cabdilaahi Xirsi** (6min, 54 sec): - Bismilaahi, Mahadsanid Gudoomiye, waxaan ku bilaabayaa **Qodobka 23aad faqradiisa 2aad** oo ka hadlaya mushaharada la siinayo ciidanka, waxaan soo jeedinayaa maadama oo barigii dhawayd aynu samaynay xeerkii ciidamada aynu mushaharaad ku qornay sida ay u kala qaadanayaan iyo sida ay u kala saraynayaan inuu ciidankan la sinaado ciidankaa oo laga daayo madaxwaynahaa ku soo saaraya, oo aynu nidhaahno sidii aynu hore ugu soo saarnay xeerka, mushaharku waxa uu la mid noqonayaa mushaharaadka kale ee ciidamada.

**Qodobka 27aad** waxa uu ka hadlayaa shuruudaha magacaabista Taliyaha **ciidanka Faqradiisa 2aad xarafka B** waxa uu ina farayaa waa in uu ka mid yahay saraakiisha sar sare ee ciidanka socdaalka, inta badan taliyaasha ciidamada waxa uu madaxwaynuhu u magacaabaa cid kasta oo Raankaa gaadha isaga oo kas oo qaadi kara ama ku badali kara ciidan kale markaa khasab ma aha inuu ka mid ahaado ciidanka ilaalada socdaaalka iyo xuduudaha, halkaa waxaan ku badalayaa qofka derajadaa gaadha ee raba inuu ciidankaa ka mid noqdo waa inuu doontaa aqoon ku saabsan xuduudaha, markaa Taliye kasta oo leh aqoonta ku saabsan socdaalka iyo xuduudaha waa loo magacaabi karaa isaga oo jooga ciidanada kale sida dhaqanka aynu u leenahay marka khasab ma aha inuu hore ugu sii jiray.

**Qodobka 33aad** masuuliyadaha dacwadaha madaniga ah **farqada 5aad** waxaa lagaga hadlayaa qodobo ku jira xeerka ciqaabta guud ayuu refarance gareeyay sida **Qodobka 34aad, Qodobka 35aad, Qodobka 36aad,** waxaan soo jeedinayaa in laga saaro numberadaa qodobadaa ku qoran, maxaa yeelay xeerkii ciqaabta guud waxa aynu hada ku wadnaa Dhalan gaddi dhamaystiran, oo marka uu hada innaga soo dhamaado noqon maayo xeerkii hore, markaa si aanu hadhaw uu jaahwareer uga dhicin numberada xeerkaa refarance garaynaya aynu ka saarno maadama uu xeerka labadalayo.

**Qodobka 34aad Farqadiisa 2aad** halkan waxaa ku jira khalad xaga qoraalka ah waxaa ku qoran isagoo iyada oo loola jeedo isaga oo **Faqarada 3aad** ee ka hadlaysa dacwadaha madaniga ah ee lagu soo oogayo askariga ka tirsan ciidanka F**arqada 3aad xafarafka T** waxay odhanaysaa fal ka dhasha gudashada shaqadiisa si **kama ah ama taxadir daro ah, labadaa kalmadood isma raaci karaan** Taliyaha ama Askarigu haduu gaysto fal taxadir daro ku dhashaya isaga ayaa iska leh danbigaa xukuumadu kama qaadi karto danbigaa ciidankuna kama difaaci karaan, laakiin hadii uu kama uga dhaco waa laga difaaci karaa wixii ka dhashana waa laga bixinayaa, markaa Askarigii taxadar daro sameeya isaga ayay utaalaa, **waxaan soo jeedinayaa in laga** saaro **Taxadir oo kama oo kaliya lagu daayo**.

**Qodobka 49aad** waxa uu ka hadlayaa deganaansho Rasmi ah, runtii sida aynu naqaano dalkeena lama bixiyo deganaansho Rasmi ah waxaa lasiiyaa ajanabiga soo gala wadanka deganaansho ku meel gaadha oo mar walba loo cusboonaysiiyo markay ugu badan tahayna 3 sano marka uu ka dhacana dib loogu cusboonaysiiyo, laakiin halkan deganaansho rasmi ah ayaa lagu soo daray iyada oo ay u eegtahay in qofka la siinayo dhalasho somalilander ah hadii uu shuruudahaa kasoo baxo.

**Maadaama oo innaga Dastuurkeena ku jirin in dhalasho lasiiyo qof ajanabi ah halkaa waxaan odhan lahaa haloo bedelo deganaansho waqti dheer** taas oo qofka lasiin karo 10 sano hadii uu shuruudaha hoos ku qoran buuxiyo laakiin deganaansho rasmi ahi innaga dastuurkeena kuma jiro, markaa halkaa halaga saaro.

**Qodobka 53aad** qodobkan oo ka hadlaya joogitaanka dadka aan dalka lahayn qodobkaasi waxa uu sheegayaa,**Stateless Residents** haduu jiro qof aan dal lahayn oo somaliland soo galaa, **waxaan odhan lahaa qodobkaa halaga saaro gabi ahaan** maadaama oo aanu jirin qof aan dal lahayni, waxaa ina soo hoos gali kara dad pasport koodii tuuray siyaabo amni daro ahna dalkeena usoo galaya markaa waxaan odhan lahaa yaynaan innagu hawshaa isku furin, qodobkaana guud ahaan aynu ka saarno meesha.

**Qodobka 80aad** waxa uu ka hadlayaa pasporka Diplomance waxaa lagu xidhay shuruuc in qofkii lasiinayaa uu madaxwaynaha kasoo qaato, waxoogaa faahfaahin ah ayaan ku daray, dadka lasiinayo pasporka diplomance waxay noqonayaan **Madaxwaynha iyo madaxwayne ku xigeenka, Gollaha wasiirada iyo labada Golle qaran Gollaha wakiilada iyo Gollaha Guurtida iyo Diplomecesiyiinta safaaradaha dunida inoo jooga intaa wixii dheer madaxwaynuhu waxa uu siin karaa cidii uu isagu fariin uu usoo qoro** laakiin waa inay ku qornaadaan 5 taasi madaxwaynaha la`aantii waa in ay qaadan karaan.

Waliba xildhibaanada labada Golle m aha in ay sugaan warqad uu madaxwaynuhu uu soo qoray ee Doorashada ay ku yimaadeen ayaa sii naysa markaa halkaa waxaan odhan lahaa halagu soo darro.

Mudane gudoomiye maadaama oo xildhibaanada doodaa ay kooban yihiin Qodobka inoogu qoran xeerhoosaadka ee halka ay 5 xildhibaan second gareeyaan wey adkaanaysaa oo waxaaba laga yaabaa xeerkaba inay ka doodaan shan xildhibaaan, bal taana sidii aynu uxalilahayn.

## Golihii 5aad Kal-fadhigii 11^aad, Fadhigii 7^aad

**26 April 2025**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Gudoomiye Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Wax ka badelka Xeerka Socdaalka maalinta 2^aad

**Md: Cabdinaasir Yuusuf Cismaan** (**Qodax** (16mi, 25sec): **-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim mudane Gudoomiye iyo mudanayaal ASC. Hadii aan wax ka yidhaahdo wax ka badalka iyo kaabista xeerka socdaalka oo ay doodiisu inuu socotay, Mudane Gudoomiye waxaan jeclaan lahaa ilaa 8 Qodob oo ka mid ah xeerkaasi inaan wixii aragtidayda ah aan la wadaago Golaha iyo shacbiga reer soamaalilandba ee inna daawan doona.

Waxayna kala yihiin **Qodobka 3^aad faqradiisa 10^aad, Qodobka 20^aad faqradiisa^2aad Qodobka 29^aad faqradiisa ^2aad Qodobka 30^aad faqradiisa2^aad Qodobka 53aad faqradiisa 1^aad Qodobka 56aad, Qodobka 69^aad iyo Qodobka 80^aad** intaas oo qodob baan anna wixii aragtidayda ah aan idinla wadaagi doonaa.

Waxaan kale oo aan gudoomiye soo jeedin doonaa ilaa seddex Qodob oo aan u arko tallo iyo tusaale, maadama uu xeerkani ayuu yahay xeer aad iyo aad umuhiim ah dadkeena iyo dalkeenuna ay maanta baahi wayn uqabaan, waxaynu ognahay Ajaaniibta badan ee manta Dalkeena qulqulaya ee aan xadlahay ee aan lakaantaroola hayn ee meel lagu joojinayaa ayna jirin ee dalka min barri ilaa Galbeed iska furan ee soo galaya ayaan arkaynaa.

Maadaama uu xeerkani yahay xeerkii socdaalka waxa aynu u baahanahay, markaa Qodobo badan oo aan muhiim aan u arko aan ku soo daro, hadaan uguddo galo nuxurka doodayda, Qodobka 3aad oo sheegaya xadka adeegsiga xeerka, gudoomiye xeerkan waxaan u arkaa xeer dalka u muhiim ah una baahan in aynu aad ulafo gurno, ubaahan inuu khuseeyo xeerarka kale sida xeerka Jinsiyadaha iyo xeerarka ciidamada in lala akhriyo, ubaahan in aad loo lafo guro, ubaahan in meelo badan wax laga eego, ubaahan dib isku shaandhayn ku samayno.

Waxaad moodaa xeerkani meelaha qaar waxaa ku jirra xarfo Talyaani ah, waxaad moodaa in meel kale laga soo minguuriyay markaa xeerkan waxaan jeclaan lahaa in meelo badan iyo xeerar badan la akhrino dabadeed isusoo ururino.

**Qodobka 3^aad faqradiisa 1^aad** waxaan ku soo darri lahaa **farqad 5aad** oo kale, qodobkani waxa uu sheegayaa xadka adeegsiga xeerka oo inta loo adeegsanayo ayuu qeexayaa,

tusaale ahaan xeerka waxaa lagu dabakhayaa, shirkadaha, shaqsiyaadka iyo cid kasta oo in uun si lug ugu leh wax kasta oo khuseeya arrimaha socdaalka ee Dalka dhulka Jsl, markaa waxaan ku soo kordhin lahaa halka uu dhulka oo kaliya ku xusey, in aynu ka dhigno, dhulka, badda iyo barriga, markaa labadaa aynu ku soo darnno.

**Qodobka 10aad** qaab dhismeedka ciidanka socdaalka, Taliska ciidanka socdaalka oo ka kooban:-a.Taliye b. Taliye ku xigeen c.Hogaano d.Qaybo iyo waaxo hoostaga Taliska e.xarumo iyo Rugo ama Goobo f. Bar kaantarool/ ama goob socdaal markaa waxaan ku soo kordhin lahaa, in sidaa ay u kala sareeyaan qaab dhismeedka ciidanku maadama uu ka mid yahay ciidanka socdaalku ciidamada JSL ee kale uu la mid yahay inuu isaguna yeesho qaab lamid ah qaababka kale ee ciidamadu ay leeyihiin, xeerarkii aynu halkan ku ansixinay sida xeerka ciidamada oo kale in qaabkaa ay sheegayaan aynu laqaadano si ay u kala sareeyaan loo kala saaro.

Sidoo kale waxa uu qodobkani xusay in Barkaantarool ama goobo socdaal lasameeyo iyada lafteedana maadama oo baddana laga soo gali karo, in xeebaha iyo goobaha badaha leh ee socdaalku kas oo galikaro iyana in ay xarumo cayiman ay ku yeeshaan baan soo jeedin lahaa in qodobka aan ku xusno ama aynu ku codayno.

**Qodobka 20aad faqradiisa 2aad**, Hanaanka Anshaxamarinta saraakiisha sare ee ciidanka socdaaka qaranka faqrada 2aad waxaa ku xusan hadii ay jirto cabasho ka dhan ah Taliyaha ama taliye xigeenka ciidanka socdaalka, marka hore waxaa la baadhayaa ama Guddi Anshax oo uu **magacaabayo madaxwaynuhu, markaa halkaa waxaan ku badeli lahaa uu madaxwaynuhu magacaabayo inuu wasiirka wasaarada arrimaha** guduhu uu saraakiisha wixii ka yimaada ee danbiyo ah marka uu isagu Guddida uu magacaabo ee xulo warbixina u keento wasiirka ka bacdi markaa u uku go`aan qaato wasiirku, halkaa madaxwaynaha waxaan ku badeli lahaa wasiirka arrimaha Gudaha.

**Qodobka 29aad** Doorka wasaarada arrimaha gudaha ee ciidanka **Faqrada 2aad** wasiirka arrimaha guduhu waxa uu kala talinayaa madaxwaynaha magacaabista iyo xilka qaadista Taliyaha ciidanka socdaalka iyo ku xigeenkiisa isaga oo raacaya xeerkan, isla faqarada 1aad wasiirka wasaarada arrimaha guduhu waxa uu leeyahay waajibaadka ku tilmaaman xeerka kala xadaynta xukuumada iyo hay`adaha madaxbanaan ee dawlada xeer L.r 71/2015, **halkan iska horimaad ayaa imanaya, waxaynu ognahay oo uu Dastuurku uu** madaxwaynaha siiyay inuu yahay Taliyaha ciidanka ee qaranka oo dhan nooc kasta oo ay yihiin, markaa waxaan odhan lahaa in laga saaro faqradaa uu wasiirku uu xaqa uu uleeyahay inuu madaxwaynaha kala talinayo in aynu ka saarno sida uu Dastuurku sheegayo ee xeerarka kale ee ciidamaduna qeexayaan inuu madaxwaynuhu uu awood uleeyahay xilka ka qaado Taliyah aiyo ku xigeenka.

**Qodobka 30aad** waxyaabaha ka reeban ciidanka socdaalka 8 faraqadood oo uu ka reebayo xubin kasta oo ka mid ah ciidanka socdaalka ama sarkaal ha ahaado ama xubin kale, **waxaan ku soo dari lahaa waxyaabaha ka reeban ciidanka socdaalka, inay ka dheeraadaan oo ay ka fogaadaaan mukhaadaraadka Noocyada kala duwan gaar ahaan Qaadka, khamriga, sigaarka, xashiishada iyo wixii lamid ah** maadama oo ay xafiiska ay joogaan ay ku matalayaan haybadii qaranka ay noqdaan dad intaaba ka reeban oo aan wax balwad leh aan lahayn si jiilalkeena danbe ay u noqdaan dad utababaran ama jidh ahaan iyo caafimaad ahaanaba dhisan.

**Qodobka 53aad** joogitaanka Dadka aan lahayn Dal (stateless Residents) waa laba faqradood oo kala faahfaahsan, 1. Qof kasta oo aan lahayn Dal uu dhalasho ahaan ka soo jeedo oo fursad u heli Karin helida dhalashada Dal kale oo dhulka JSL ku joogay oo ku noolaa muddo 10 sanadood oo xidhiidh ah,waxa uu xaq uyeelanayaa in loo ogolaado joogitaanka iyo deganaanshaha dalka marka uu soo codsado ee buuxiyo shuruudaha si waafaqsan Qodobka 4(1)ee xeerka jinsiyda xeerL.r22/20012.

Gudoomiye xeerka jinsiyadu waxa uu qofka xaq usiinayaa qof reer Somaliland ee xaqa u leh qodobo ayu uku xusayaa tusaale ahaan waxaa ka mid ah 1960 kii dadkii ku noolaa JSL inay nooc ay doonaan ha ahaadaane in ay dhalasho ahaan in ay xaq uleeyihiin in ay qaataan deganaashaha dhalashada dalkan JSL, halka qodobkana uu siinayo qofka hadii 10 sano uu joogo uu heli karo ama uu xaq uyeelan karo dhalashadii ama deganaanshihii.

Markaa waxaan qabaa hadii aynu qodobkan sidiisa aynu ku sii dayno waxaa ku nool dalkeena dad ilaa 20 kii sano ilaa 30 kii sano ee udanbeyay ku nolaa oo aan hayb ahaan iyo dhalasho ahaan kasoo jeedin Somaliland oo ku tarmay oo ku dhaqmey oo ku dhalay, dadkaasi xeerkani xaq buu siinayaa in ay deganaansho helaan, matalan waxaa ka mid ah oromada goob kasta oo aad arkaysaan toban toban iyo labaatan labaatan iyaga oo socdan, aad arkaysaan qaarkood inagu dhex noolaa sanawaad, kuwaas ayuu xaq usiinayaa in ay dhalasho yeeshaan hadii qodobkan sidaa xaq usiiyo dalkeena meel dheer ayaa laga eegayaa.

**Markaa waxaan qabaa sidaa xeerka jinsiyadu uu dhigayo in aynu kana ku dabaqno oo in qofkii 1960kii kunoolaa JSL ay xaq uyeeshaan oo 10 kaa sano ee la xadiday Meesha laga saaro si aynaan mar danbe dalkeena cid kale ugu gacan galin**.

**Qodobka 56aad** oo qeexaya midaynta qoyska qofku marka uu Dal joogo ee uu sharcigiisi qaato ama helo markaa asna waxa uu awood uyeelanayaa inuu famligiisii keeno, waata badanaa dhacda dad badan oo afrika kunool ay yurubta oo kale markaa ay qoysaskooda ay qaxeeyaan sidoo kale qodobkana kii oo kale ayaa loo soo min guuriyay, bal teenii ayaynu utaag la`nahaybe oo dalkeenii ayaad arkaysaa baaxadiisa cida ku nool

iyo cida soo galaysa aynaan ka adkaane awood ma u leenahay famli kale cid kale ay soo xanbaarto.

Markaa Gudoomiye waxaan qabaa **Qodobkaan 56[aad]** ee midaynta qoyska iyo **Qodobka 57[aad]** oo sheegaya habraaca midaynta qoyska labadaaba in laga saaro xeerka, hadii kale waxa aynaan kaantarooli karayn dad dad badan oo aynu soo xanbaarno oo dalkan ku noolaan doona oo qoysaskoodu ku tarmi doonaan ayaynaan hadhaw awood uyeelan doonin sidii looga saari lahaa.

**Qodobka 80[aad] shuruudaha passport diplomency**, markaa waxaan soo jeedin lahaa mudanayaal sidii xubnihii iga horeeyay ay sheegeen in xubnaha Golayaasha qaranka loo doortay in ay xaq u yeeshaan in passport deplomency ay qaataan sidoo kale ay ku xadidnaadaan muddo xilood kooda ay Gollayaasha ay joogaan, laakin Madaxwaynuhu cidii kale ee uu siinayo pasporka deplomecysiga ah inuu xaq u leeyahay inuu siiyo .

Ugu danbayn gudoomiye waxaan ku soo ururin lahaa in xeerkan gudoomiye aynu lafo gurno maanta ajaaniibta badan ee bad iyo barriba ka soo galaya ee dhibta innagu hayaa, runtii halkan kuma arag qodobadii lagu saari lahaa iyo sidii loo saari lahaa cida saaraysa ma wasaaradda arrimaha gudahaa ma ciidanka socdaalkaa, muddo intee leeg ayaa lagu saarayaa taasina kuma qorna xeerka, markaa taasna waxaan soo jeedin lahaa in aynu ku darno oo maanta dadkeenii waad arkaysaan, ajaanibka shaqada ku soo gala sharciyada ay ku soo galaan ma aragno.

Waxaan soo jeedin lahaa guud ahaan in Dalka laga saaro ajaanibta ku soo qulqulaysa gaar ahaan Oromada meel walba joogta iyo kuwa kale ee ku dhex nool waxa intaa inoo dheer, dhamaan shaqadii ay qaban lahaayeen muwaadiniinta reer Somaliland ayay dadkaasi qabanayaan nooc ay doonaan ha ahaadaan, dhismayaashii ayaa ugu danbeeyay oo wey soo galeen, kuwii muwaadiniinta ahaa iyaga oo bilaa shaqo ah ayay meel walba taagan yihiin, gudoomiye waxaan soo jeedin lahaa Golle waynaha iyo dhamaanteeba iyo shacabka reer Somaliland iyo xukuumadaba usoo jeedin lahaa in dadkaa si deg deg ah loo saaro si umadda kale ee reer somliland ay fursadaha u hesho.

Waxaan soo jeedin lahaa mudane gudoomiye xeerkan dad badan baa ka hadlaya dadka diyaaradaha kasoo galaya iyo xiliga la celinayo iyo goobta lagu celinayo, taasina aa duma faahfaahsana waxaan soo jeedinayaa iyadana runtii in dhawr qodob lagu darro oo runtii lagu xadaynayo cidda laga masaafurinayo, iyo mudada uu joogayo, diyaarada soo qaada qof aan reer Somaliland udhalan oo aan raali ka hayn diyaarada soo qaada wixii laga yeeli lahaa qaabka ay mudan lahayd, Anjensiga u jaray Tikitka waxaas oo dhan ciqaabtii ka dhalan lahayd kuma taal xeerkan, taas waxaan jeclaan lahaa iyada oo faahfaahsan in aynu ku darno.

Mudane gudoomiye waxaan soo jeedin lahaa in xeerkan doodiisu markay dhamaato in xubno kooban oo Guddi ah loo saaro iyo Garyaqaano sharci ee Gollaha oo markaa dib la iskugu soo habeeyo si looga dhaxlo xeer nidaamsan oo wanaagsan oo qurux badan oo dalkan iyo dadkan anfaca.

**Md: Bile Cabdi Ducaale samatar(4min, 29sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Anigi in aan ka fikir duwanahay mudanayaasha doodan ka qayb galay, sabab too ah halkan waxaa ku yaala xeerka ciidanka socdaalka oo waliba xeer hore ujiray ah oo wax ka bedel iyo kaabis lagu sameeyay, sida ku cad Dastuurkeena Qodobkiisa 28aad faqradiisa 2aad, waxa uu sheegayaa, Dastuurka ayaa ugu sareeya xeerasha Dalka, xeer kasta oo aan isaga waafaqsanaynina waa waxba kama jiraan,Dastuurkeena ayaa loo raacayaa xeerarka Dalka xeerka aan waafaqsanaynina waa waxba kama jiraan.

Hadaba Dastuurkenu muxuu sheegayaa marka ciidamada laga hadlaayo waxaa ku cad Dastuurkeena sida qodobka 123 ee Dastuurka, ciidamda qaranku in ay yihiin, milatariga, ciidanka Booliska iyo ciidanka Asluubta.

Meel ay kaga taal ciidanka socdaalka ma jirto, xeerkeenan dhamaan tii waxaa ku taal ciidanka socdaalka, markaa ma qodob Dastuuri ah ayaynu ku kordhinaynaa innagu, horena wuu u jiray oo wax ka badal ayaa lagu samaynayaa xaguu ka yimi ciidanka socdaalku,waa in aynu isweydiinaa maadama aynu nahay mudanayaashii qaranka.

Dastuurka wixii ka soo horjeeda waa in aynu waafajinaa ama aynu Meesha ka saarnaa, ciidanka socdaalku waa ciidan aan waafaqsanayn dastuurkeena, waxaana loola jeeda laanta socdaalka sida aan anigu hore ugu ogaa, laanta socdaalku waxa ay hoos tagi jirtay commondo policeya, waa in ay Taliyaha guud ee ciidanka ay hoos tagtaa, shaqo Ahaana wasaarrada arrimaha Gudaha hoos tagtaa, ciidan ahaa Taliska guud ee policeka waa in ay hoos tagtaa.

Markaa xeerkan waxaan u arkaa xeer qayrul Dastuur ah oo aan waafaqayn dastuurkeena, ciidan layidhaahdo ciidanka socdaalku ma jiro, ama waa in aynu policeka hoos gaynaa ama hadii milatariga loo dirsado waa in aynu hoos gaynaa, ama waa in aynu Asluubta hoos gaynaa, seddexdaa ciidan baa Dalka ka jira wixii kale ma aha ciidan.

Hadii aynaan hoos gayneen ciidamada ama ka dhigayn laanta socdaalka oo aynaan hoosgaynayn taliska booliska, shaqo Ahaana wasarada arrimaha gudaha aynaan hoos gayn waa in aynu ka dhignaa, Ha`yad madaxbanaan, sidii aynu usamaynay Hay`ada **ciidanka sirdoonka qaranka Ama ciidanka Dabdamiska oo kale, oo Meesha aynu ka saarnaa ciidanka socdaalka, waa in aynu nidhaahnaa Hay`ada socdaalka iyo Jinsiyadaha.**

Markaa wixii aan Dastuurka waafaqsanayn sidaas ayay waxba kama jiraan uyihiin, **waxaan soo jeedinayaa Gabi ahaan in xeerkan lagu noqdo, oo Guddi loo saaro iyo**

Garyaqaano, iyo xeeldheerayaal iskugu jira in aynu usaarno, si loo soo ururiyo laga dhigo laanta socdaalka oo policeka hoos tagta ama, laga dhigo Hay`ad madaxbanaan oo hay`ada socdaalka la yidhaah, labadaa Qodob waa in uun mid uun laga dhigaa, gudoomiye waad mahadsan tahay.

**Md. C/kariim Muxumad Maxamd (13mi, 59sec):-** Bismilaahi, Mudane Gudoomiye aad baad u mahadsan tahay, Xildhibaanada, Saxaafada iyo Shaqaalahaba ASC. Doodda Xeerka Socdaalka Somaliland waxaan kaga qayb-qaadanayaa qodobadan soo socda.

Mudane Gudoomiye marka hore waxaan u mahadcelinaynaa Gudiddii soo diyaarisay Xeerkan ee Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada ee Golaha. Xeerkani waa wax ka badelka Xeerka Socdaalka, marka bayjka kowaad waxaan rabaa inaan sixid ku sameeyo, magaca Xeerka waxa laga dhigay Wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Socdalaka, markaa xeerkaas hore oo inta badan wax ka laga soo badelay wuxuu ahaan xeerkii laanta socdaalka Xeer Lr. 72/1995kii, **marka waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo magaca Xeerka wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Laanta Socdaalka** oo Ciidanka laga saaro.

**Qodobka 2aad ee Eray-bixinada**, eray-bixinta sida gudiddu u soo gudbisay si alpha Pite ama kala horaynta xarfaha looma raacin, markaa waxaan soo jeedinayaa iyadana in la nidaamiyo oo siday u kala horeeyaan xarfuhu loo soo kala horeysiiyo.

**Erayga Sarkaal** waxa la yidhi waxa loola jeedaa xubin ka tirsan ciidanka somliland, marka waxa laga ilaahay socdaal, waa in lagu daro **Socdaa**l oo laga dhigo **Sarkaal** Waxa loola jeedaa xubin kasta oo Ciidanka Somaliland ka mid ah oo gaadha darajadda xidigle iyo wixii ka sareeye.

Sidoo kale **Erayga Sarkaal Xigeen** waxa laga dhigay darajada gaadha alifle ilaa kormeere saddexaad, marka ciidanka darajada sarkaal xigeen waxay ka bilaabanta ***laba alifle iyo saddex xadhigle,*** halka kormeere saddexaadna maan fahmin malaha saddex xadhiglay u jeedaan

**Qodobka 5aad** ee mabaa'diida iyo gundhiga Xeerka, waxaan soo jeedinayaa in qodobkaas laga soo horasyiiyo Ujeedada Xeerka oo Qodobka 4aad, marka Qodobkan laga dhigo 4aad Ujeedadana Qodobka 5aad.

**Qodobka 16aad ee Qaab-dhismeedka iyo Darajooyinka,** qaab-dhismeedka iyo darajooyinka ciidanka socdaalka waxa laga dhigay saraakiil sare, sarkiil hoose, marka waxaan soo jeedinayaa in saddex qaybood laga dhigo, **saraakiil sare, saraakiil dhexe iyo saraakiil hoose.**

**Farqada 1aad** Sarkiisha sare labaan u kala jabinayaa kala ah in **Sareeyo Guud, Sareeye Gaas iyo Sareeye Guuto laga dhigo Saraakiisha sare**, halka **Gaashaanle** ah waxa laga dhigay

sareeye guud ilaa gaashaanle, markaa **sare, Gaashaanle Dhexe iyo Gaashaanlena laga dhigo saariik dhexe oo ay noqdaan farqada 2aad. Farqadii 2aad ee saraakiil hoosena ay u noqoto Farqada 3aad. Sidoo kale farqadii 3aad noqoto tan 4aad oo ah saraakiil xigeenada iyagoo noqonaya saddex xadhigle ilaa laba alifle halka xadhigle laga dhigay inuu u hoosaynayo, farqadii 4aad ee askari oo iyadu sida saxda ah ka bilaabmaysa alifle ilaa Jadiid wuxu noqnaya farqada 5aad.**

**Qodobka 19aad ee Dhamaadka Shaqada Xubnaha Ciidanka** waxaan soo jeedinayaa in loo raro dhamaadka cutubka oo uu noqdo Qodobka 21aad oo qodobkan loogu dambeysiiyo cutubka madaama shaqadii sii socoto qodobada ka dambeeya, qodobkii 21aad u guuro, 20aad, halka Qodobkii 20aad u guurayo Qodobka 19aad.

**Qodobka 23aad ee mushaharka ciidanka oo ciidanka laanta socdaalka loola jeedo, waxaan soo jeedinaya in sideeda loo daayo oo inagu aynaan jaangoyn si aanay u noqon inay halkaas taagnaato oo xeerka u dabranaato, marka aynu u dayno in Madaxweynaha iyo Xukuumadiisu oo ay noqoto awooda dhaqaale ee lagu jaangoynayaa Miisaaniyada.**

**Qodobka 48aad ee Ogolaanshaha joogitaanka mudaysan, Farqada 3aad** waxay leedahay marka ogolaansho joogitaan mudaysan la siinayo **Xarafka C** ***Waxaa Madaxa Xafiiska Socdaalku awood u leeyahay inuu weydiiyo Tigidh uu ku tago Waddanka ugu dhow oo loo oggol yahay inuu galo iyo Qadar Lacag ah oo aan ka badnayn 25%,*** marka lacagtaasi maxay noqonaysaa ma ganaax baa, markaa waa inaynu cadayno oo hadii ay ganaax tahay ay khasnada dawlada ku dhacdo.

**Qodobkii uu ka hadlay Xildhibaan C.naasir Qodax ee z**no lagu siinayo hadii lagu siinayo ajaanibta jinsiyada ama wax la mid ah oo sharci ah, iyadana aynu qodobkaas ka saarno oo dadka ajaanibka ah ee dalkeena ku soo qulqulayaa culays bulsho iyo culays dhaqaale ayay inag hayaan, maria waxay keeni doonta madaama aynu nahay dad tiro ahaan kooban oo dadkeenu 5 milyan wax ku dhaw lagu qiyaaso tiradooda inaynu iska xadidno intaynu awood ahaan iyo dhaqaale ahaan aynu korayno si aanay dadkaasi u noqon kuwo dalka culays ku keena.

Marka dadka ajaanibka ka shaqeeya dalka waa in laga saaro inay qoysaskooda keenaan ee waa inay shaqada ay qabanayaan uun markay dhameeyaan dalalkoodii ku laabtaan iyagoon wax qoysaskooda ah inagu soo rarin, waana inaynu kaantroolno ajaanibka dalka soo galaya madaama muwaadiniinta ay manta culays dhaqaale ku hayaan xaga shaqada, dawlad ahaan arrintaas intaynu siyaasad ka yeelano intaynu isku xadidi karnona iska xadidno ayaan soo jeedinayaa.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa inaynu kordhino lacagta dal kugalka maadaama ajaanib badan inagu soo qulqulayso si aynu dhaqaale uga heli karno isla markaana

iskaga xadidi karno, marka lacagaha deganaan shaha iyo dal kugalka waa aad loo kordhiyo.

Ugu dambeyn, waxaan soo jeedinayaa marka laga hadlayo xarfaha aynu xeerka u isticmaalnay meelaha qaar xarfaha somaligaynu isticmaalmay sida b,t iyo j meelaha qaarna English baynu isticmaalnay a,b,c, markaa in la isticmaal somaliga meelaha English ah xarfaha la isticmaalay.

**Md. Axmad Maxamed Maxamuud (Kaare) (17mi, 02sec):-** Gudoomiye iyo Mudanayaasha Sharafta leh waxaan idinku salaamayaa Islaamka ASC, waxaan halkan ku soo gudbinayaa doodayda.

Soo jeedintayda kowaad waxa weeye in marka hore tusmada xeerka la saxo, waayo tusmada xeerku waxay ka kooban tahay 6 cutub, markaad xeerka dhexgashona waa la iswaydaariyay oo waa typing error, sida cutubka 4aad ee dambiyada oo lagu qoray cutubka 5aad iyo cutubka 5aad oo ka hadlaya baasaboorka iyo waraaqaha socdaalka oo isna laga dhigay cutubka 6aad.

**Qodobka 41aad** waxaan soo jeedinayaa oo ka hadlaya ogolaanshiyaha imaatinka dalxiiska in lagu daro farqada 3aad xarfahan soo socda oo kala E, F, Giyo H oo kala noqonayaa:-

- **E. Waa inuu haysta warqada Caafimaad**
- **F. Waa inuu haysto warqad dambi la'aan.**
- **G. Waa inuu haysto dhaqaale ku filan intuu joogo.**
- **H. Waa inuu haysto ciwaan lagala xidhiidhi karo.**

**Sidoo kale Qodobka 41aad Farqadiisa 4aad** waxay si toos ah uga horimanaysaa **Farqada 3aad xarfaheeda C iyo D**, tusaale ahaan Xarafka C waxay ka hadlaysaa qofka dalxiisa ahi intuu dalka joogaya ugu badnaan 3 bilood buu joogi karaa, halka Xarafka D sii faah-faahinayso oo sheegayso hadii uu u baahdo in loo kordhiyo waxa u kordhinaya Wasiirka Arrimaha Gudaha, iyadoo laba jeer oo min 3 bilood ah ayuu wasiirku u kordhin karaa, dalxiisahaasi ugu badnaan wuxuu dalka joogi karaa 9 bilood.

Laakiin **farqada 4aad** waxay sheegaysaa inuu qofka daxiiska ahi ugu badnaan dalka joogi karaa laba sannadood muddo ku siman, marka waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo wuxuu dalka joogi karaa ugu badnaan muddo aan ka badnayn 9 bilood, hadii uu doono intaas in ka badana waa dalka ka baxaa oo mar labaad soo dalbadaa.

**Qodobka 43aad** ee Xeerka oo ka hadlaya ogolaanshiyaha imitaanka aqoonta iyo cilm-baadhisyada, waxaan soo jeedinayaa in qodobkaas laba qodob loo kala qaado, qodob waxbarashada rasmiga ah iyo Qodob waxbarasho aan rasmi ahayn sida cilmi-baadhisyada, tababarada iyo wixii la mid ah ee aan mudo qaadanayan una baahnayn vise sannado qaadanaya.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Qodobkaas lagu daro laba **farqadood oo dheeraad ah oo noqonaya Farqada 10aad iyo Farqada 11aad** kuwaas oo kala ah muddada uu qaadanayo dal ku galka waxbarashadu waayo isku mid noqon mayso inanka waxbaranaya ee 5 sanno dalka joogaya iyo qof aqoon iswaydaarsi inoogu yimi, markaa **Farqada 10aad** oo noqonaysa **waxbarashada rasmiga ah in dal kugalkeeda (visa) laga dhigo sannadle iyadoo xeerka loo eegayo,** waayo hadii inanka 4 sanno jaamacad dhiganaya 4tii sanno la siiyo inuu joogo iyo inuu iskaga tagay jaamacadii lama kala garanayo, marka si loo hubiyo waa in sannadle laga dhigaa.

Halka **Farqada 11aad** aan soo jeedinayo in **"qofka dal kugalka (Visa) aan rasmiga sida cilmi-baadhista iyo aqoon korodhsiga waxa la siin karaa, hadii uu u baahdo muddo dheeraad ah Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha wuxuu u kordhin karaa laba jeer muddaas midkiiba"**

Isla **Qodobka 43aad Farqada 3aad** ee Shuruudahah qofka waxbarasho inoogu imanaya waxaan ku kordhin lahaa farqadahan soo socda :-

D. "waa inuu ogolaansho ka haystaa Wasaarada Waxbarashada Somaliland,
E. waa in ay cadaato cidda kafaalo qaadaysa dhaqaalihiisa.
F. waa inuu haysta Waraaqaha Caafimaadka oo la hubiyo Caafimaadkiisa.
G. waa inuu haysta Warqada dambi la'aanta dalku ka imanayo.

**Qodobka 45aad ee hanaanka dalbadashada ogolaanshaha shaqo ee ajaanib,** waxaa soo jeedinayaa in lagu daro farqadahan soo socda:-

7. Waa inuu ogolaansho ka haysto Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
8. Waa inuu damaanad ka haysto loo shaqeeyaha uu shaqaynayo
9. Waa in loo shaqeeyaha dalbaday qofka ajaanibka ah uu haystaa warqadii cashuur la'aanta.
10. waa inuu jiro heshiis mudaysan oo u dhexeeya loo shaqeeyaha iyo qofka ajaanibka ah.
11. Waa inuu haysta Waraaqaha Caafimaadka oo la hubiyo Caafimaadkiisa.
12. Waa inuu haysta Warqada dambi la'aanta dalku ka imanayo.
13. Waa inuu ogolaansho ka haysta loo shaqeeyaha hadii muddada heshiiska uu shaqo kale u wareegayo.

**Qodobka 47aad ee Waajibaaka saaran loo shaqeeyaha,** waxaan soo jeediyaa **farqada 1aad Xarafka D** in laga saaro ee Reebanaanta kafiilka oo wuxuu Meesha kar saarayaa damaanadii qofka ajaanibka shaqaalaha ahi uu ka damiin ahaa loo shaqeeyuhu oo isagu ka kafiil ah, marka waa in laga saaro farqadaas. Marka waxaan soo jeedinayaa in farqadaas loo badelo sidan **"waxa reeban dhaqankasta oo ka soo horjeeda bini'aadnimada oo qofka loo shaqeeyaha ahi kula kaco qofkaas shaqaalaha** ah"

**Qodobka 48aad ee Ogolaanshaha Joogitaanka mudaysan Farqada 1aad** waxa ka maqan qodobka la tixraacayo ee wax ka reebaya

**Qodobka 49aad ee Deganaansho rasmi ah,** wxaan soo jeediyaa **farqada 3aad Xarafaha A iyo B oo sheegaysa** Oggolaanshuhu wuu dhacayaa ama buriyaa haddii- A. Daneeyuhu ka maqnaado dalka S/land muddo ka badan **Saddex Sano oo xidhiidh ah**, B. Daneeyuhu ka maqnaado dalka S/land muddo ka badan **Hal Sano** oo xidhiidh ah Muddada Saddex Sanadood ee u horeeya, marka si ay isuwaafaqaan labada farqadood waa in Xarafka A lagu dara **"hadii uu deganaa dalka saddexdii sanno ee u dambeysay",**

**Qodobka 65aad Farqada 1aad** ayaan saxayaa, waxbaa ka maqan oo lama sheegin cidda awood u leh inay dhagaystaan dacwadaha la xidhiidha arrimaha socdaalka, marka waxa halka loo baahan yahay in lagu sheego ciddaa xaq u leh inay dhagaysato dacwadaas sida in gudi dhagaysi dacwadeed ah la sameeyo oo xeerka lagu dhex abuuro iyo maxkamad xaq u leh oo kale la siiyo.

**Qodobka 72aad** waxaan ku raacsanahay Xildhibaanadii iga horeeyay sida Md. C/naasir Qodox iyo Xildhibaanada Maalintii hore ka dooday.

Waxaan soo jeedinayaa in lagu daraa Cutubkaas Qodob sheegaya cidda xaq u leh inay qaataan baasaboor diblomaasi ah, waayo xeerkan kuma qorna cida xaq u leh, in Madaxweynuhu ogolaanayo uun baa la inoo sheegay, marka waxaan soo jeedinayaa qodob dheeraad oo qeexaya cida xaq u leh, waxaan ka dhigaya Qodobkaas sidan:-

1. Waxa xaq u leh Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka
2. Xubnaha Wasiirada
3. Xubnaha Safiirada iyo Danjirayaasha
4. Xubnaha Baarlamaanka labada Gole.
5. Saraakiisha sare ee Dawlada ee baxaya Safaro rasmi ah oo shaqo.
6. Shaqaalaha Arrimaha Dibada ee fulinayo arrimo diblomaasiyadeed iyo
7. Cid kasta oo Madaxweynuhu ku qanco inay muhiim tahay in la siiyo si ay u gutaan hawlo diblomaasiyadeed oo dalka dan u ah.

Waxaan soo jeedinayaa oo aan taageerayaa soo jeedintii Xildhibaan Bile Cabid Goohe ee ahayd ***in Xeerkan socdaalka laga dhigo hay'ad ee aan laga dhigin Ciidan***.

Waxa kale oo aan ku raacsanahay Xildhibaan C/kariim iyo Xildhibaan C/naasir horta si xeerkan loo dhaqangaliyo waa in cidkasta oo ajaanib dalka sharci daro ku joogta laga saaraa, waayo orormadii baa dalka ka buuxda, meel kasta dalka waa laga soo galayaa, laakiin anigu ma qabo in qof aqoontiisa iyo khibradiisa loo baahan yahay oo Wasaarada Arrimaha Bulshada cadaysay in loo baahan yahay loo diido inuu reerkiisii soo kaxaysan karaan oo halkan la degi karaan. Intaas ayaan kaga baxayaa. WSC.

**Md. Mukhtaar Xasan Maydhane(26mi, 16sec):-** waad mahadsan tahay Gudoomiye iyo Mudanayaalba, waxaan jeclahay doodayda inaan u kala qado saddex qaybood, mid guud, qodobo si guud u saamaynaya Xeerka iyo Qodobo gaar ah oo xeerka ku jira.

Tan guud hadaan ku horeeyo, waxaan tabayaa oo Mudane Gudoomiye u baahanahay qodobada nuxurka ka hadlaya oo ay laba doodood kala noqoto, hadaan soo qaato waxyaabaha soo noq-noqnaya hadada u fiirsato Mudane Gudoomiye Xeerkan Socdaalku ma hay'ad bay ahayd inay ahaato mis ciidan bay ku haboonayd? Waa dood ku saabsan nuxurka xeerka qodobo farabadan saamayn ku leh, waliba waxay igula haboonayd intaan gudiba loo dirin xeerka laga sii doodo.

Sidoo kale, Mudane Gudoomiye waxaan dareemaya in xeerarku inta badan noqdaan kuwo aad u faah-faahsan taas oo keenaysa in tuductuduc wax looga badelo, arrimaha qaar waxa haboon Mudane Gudoomiye inaynu u wakiilano xeer-nidaamiye, xeerkan laftiisa way ku jirta arrimo uu wakiilano xeer-nidaamiye uu wakiilanayo arrmaha qaar, laakiin arrimo badan oo aan gadaal ka xusi doono ayaan ka arkay oo soo noqonoqonaya, marka inta xeerka qodobadiis noqonaysa iyo waxyaabaha ku haboon inay noqdaan xeer-nidaamiye inay kala soocnaadaan baa fiican.

Arrinta labaad, markaad eegto xeerkan guud ahaan, su'aalaha ugu adag waxa ka mid ah ma hay'ad baa mise waa ciidan, aduunyadu waxay u badan tahay intaan ka baadhay hay'ad inay ahaato oo aan la ciidamayn, meelo ciidameeyaan way jiraan, farqiga u dhexeeyaana waxa weeye nooca xuduud, meelaha xuduudaha si sahal ha lagu soo galo waxay u baahan yihiin in la ciidameeyo marka loo eego meelaha aan xuduudooda si sahal ah loo soo gali Karin oo leh wax ka horjooga dadka sida bad ama buur oo kale.

Waxaan **anigu qabaa inay ahaato ciidan duruufo badan markaan eegay**, waxaana aaminsahay in hay'addan laga dhigo ciidan, inay ahaato qayb ka tirsan booliiska Somaliland oo aanay ahaan qayb gabigeeduba kawada madax-banaan ciidamada, wada shaqayn dhowna way leeyihiin ama ha noqoto cidii dambi dalka ka gasha ama soo qabashada iyo xogaha la xidhiidha, iyo haday tahay isgaadhsiiba.

Mudane Gudoomiye, Xeerkan waxa ka muuqata inay isku dhex jiraan qodobada ka hadlaya socdaalka iyo qodobo ka hadlaya dhismihii hay'adda socdaalka ama ciidanka socdaalka, marka waxay ila tahay marar badan ay keenta isku dhexdarkaasi in la ilduufo midkood shaqadooda oo aan midnaba hagaag looga yar bogan, ***marka in la kala qaado act of establishment-ga iyo act of operations-ka.***

Socdaalku maaha wax hay'ad kaliya gabigiisuba kuwada eekaada, tusaale ahaan sida dunida kale ka dhacda in la soo saaro liiska shaqada shaqaaleheeda dibada laga soo dhoofsan karo, sidoo kale tusaale ahaan hadii la abuurayo investment visa shuruudaha iyo waxyaabaha ku xidhan dadkani inay investors yihiin waxa go'aamisa cid ka baxsan

socdaalka, marka xeerarka badankoodu qaabkaas ayay u dhisan yihiino shaqada la doonayo in la qabto ama hawl-galka waxa wadaagi kara cid ka baxsan hal hay'ad oo kaliya, sidaa darted, ***waxaan soo jeedin lahaa in la kala saaro Xeerka Aasaaska ciidanka socdaalka iyo xeerka lagu maamulayo Socdaalka.***

Waxa kale oo ka muuqata xeerka markaad eegto inuu si ugu foogan yahay ujeedada hay'addani ka leedahay socdaalka dadka, laakiin dunida ay maamulaan xadka siday uga gudbayso badeecadu door bay ku leeyihiin, kamana muuqato doorka ay ku leeyihiin, sidaa darteed waxaan u baahanahay qodobada ka hadlaya xadadka ay ka talaabayaan dadku in lagu lamaaneeyo iyo badeecooyinka.

Intaas markaan ka gudbo, waxaan gudagalayaa Qodobadii Xeerkan.

Dabcan waxa ugu horeeya ee ay taabanaysaa soo jeedimahaygii waa **Magaca Xeerka** waxaan soo jeedinayaa inay kala noqdaan Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Xeerka Socdaalka oo la kala saaro.

**Qodobka 3**aad waxa ku xusan in loo adeegsanayo marka la eego *"qofkasta oo ajnabi ah"* qofkasta oo ajnabi ah kaliya loo adeegsan maayee muwaa'diniintana waa loo adeegsanayaa, markaynu ka hadlayno baasaboorka diblomaasiga iyo baasaboorka caadiga ah ee adeega ah waa loo adeegsadaa, marka ajnabi kaliya kuma koobnee muwaa'diintana waa loo adeegsanayaa.

**Qodobka 6**aad sidaan hore u soo jeediyay Farqadiisa 2aad waxay ka hadlaysaa Ciidanka Socdaalka, marka waxaan soo jeedinayaa inay noqoto oo lagu fadhiisiyo in ciidanka socdaalku yahay laan ka mid ah Booliiska Somaliland.

**Qodobka 7**aad wuxuu xusayaa in Ciidanka socdaalku leeyahay shakhsiyad qaanuuniya oo la dacwayn karo waxna uu dacwayn karo, marka halkan ayaa ku haboon in lagu xuso halka laga dacwayn karo ama maxkamada laga dacwayn karo, qodob soo socda sheegaya maxkada laga dacwayn karo, laakiin in isla qodobkan lagu xuso ayaa fiican oo aan soo jeedinayaa.

**Qodobka 9**aad ee Xarunta Ciidanka Socdaalka iyo xarumo goboleedyada, mudanayaal marar horena waan ku doodday, hadaynu wax kasta ku ururino caasimada oo kaliya oo aynu ka dhigno xarunta shay kasta, ceebta ay yeelanaysa waxa weeye in aanay dareemin cida caasimada ka baxsan sida ay u dareemi karaan dadka caasimadu, Xeerarka waa inaynu xisaabta ku darsano si wada-lahaanshaha qaranku uu u sii wanaagsanaado inay xarumaha qaarkood oo aan daruuri ahay aynu ka dhigi karo meelo ka baxsan Hargeysa, taas macneheedu maaha inaan sideeda u diidanahay Hargeysa inay xarun xafiis noqoto, laakiin waxay abuuraysaa dareen dadka kale oo dhami ay ka qabaan Caasimada, inaguna waxaynu ku sifoobayna kuwa lahaa Xamar laga daaraa Hargaysa laga daaraa inaynu ku

badelno, marka aynu ka digtoonaano taas, waxaana soo jeedin lahaa in Xaruntan laga saaro Hargeysa oo xarun madaxeedka taliska ciidanka meel kale laga dhigo.

**Qodobka 10aad** ee **Qaab-dhismeedka Ciidanka Socdaalka**, meelaha qaar waxaynu isticmaalayna kalmada talis, marka aynu isticmaalayno talis ma cada in loola jeedo taliyaha guud ee ciidankaas socdaalka iyo inuu kula jiro taliye ku-xigeenku iyo inay kula jiraan hogaamada la sheegaa, sidaa darteed, waa in ama Xeerka lagu qeexo waxa loola jeedo talis ama aan la isticmaalin

Waxa ila mudan mudane Gudoomiye Xeer-nidaamiye ayuu u baahan yahay in lagu cadeeyo sida ku xusan qodobka 16aad farqadiisa 5aad oo sheegaysa xeer-nidaamiyaha lagu anshaxmarinayo shaqaalaha, marka xeer-nidaamiyahaashi wuxuu noqon kara mid wada daboola qaab-dhismeedka guud ee ciidanka socdaalku waxay kala yihiin iyo go'aan walba heerka lagu gaadhi karo

Sidoo kale **Qodobka 10aad** ee qaab-dhismeedka waxa kale oo aan ku cadayn imisay noqonayaan hogaamada ciidanka socdaalku yeelano karo, inay daba-furnaato maahee waa in la cadeeyo inta hogaanadu noqonayaan, hadii kale waa in la cadeeyo sida qaab-dhismeedku ku imanayo ma xeer-nidaamiyuu ku iman doona mise qaab ka duwan qaabkaas.

**Qodobka 11aad ee dirayska Ciidanka Socdaalka** waxa ka maqan oo ay ila tahay inay jiri karaan ciidamo socdaal oo aan ku hawl-galin dirays laakiin wata aqoonsi, mudane Gudoomiye dunida waxa ka dhacda in hay'addan oo kale ay soo marto xafiisyada lagu shaqaynayo ayna eegto ajaanibka shaqaynaya inay haystaan fasixii socdaalka iyo ogolaanshihii inuu ka dhex shaqayn karo dalka, sidaa darteed uma haboon inay isasii iclaamiyaan oo muuqaalkooda sheeda laga sii garto. Laakiin kuwa ka hawlgaya xuduudaha ayay daruuri tahay in loo helo labiskan lagaga garan karo hawl-wadeenada kale ee xuduuda ku sugan.

**Qodobka 13aad Farqadiisa 2aad** waxay ka hadlaysa bixinta dal ku galka, dunida visaha ama dal ku galka waxa bixiya waxa weeyaan qunsuliyad, marka waxa ila haboon dal kugalada in loo daayo qunsuliyadaha laakiin waxay leeyihiin go'aanka kama dambeysta ah ee lagu soo gali karo dal ciidankan socdaalku. Hadii aanay jirin qunsuliyad waxaynu u baahanayna xeer-nidaamiyayaal nidaamiya sida wadamada aynu heshiis wada xidhiidh la samaysanayno ama kaba dhaafayno dal kugalka, marka waxaynu u baahanay go'aamadaas iyo sida lagu gaadhayo in xeer-nidaamiye lagu tacaalo arrimahaas, laakiin ilama ah in hay'addani ama ciidankani yahay cidii ku haboonayd ee dal kugalka bixinaysa.

Sidaa darteed, waxa **Qodobka 13aad** lagu dari karaa farqado kale oo ay ka mid tahay fulinta iyo ogolaanshaha, waxay ka hubinayaan dal kugalka iyagu malaha bixinta dal

kugalka (visa) iyo dukumentiyada uu ku qaatay. Waxa kale oo ay leeyihiin inay eegaan hadii uu ku xad-gudbay ogolaanshihii hore ee la siiyay, waxa kale oo ay maamulaan oo lagu dari karaa qodobkan iskaga gudubta alaabta ee xuduuda, marka alaabuhu uma baahna oo kaliya cashuur laga qaado eh, sidoo kale waa la eegaa, sidoo kale waxa ka maqan hawlaheeda siday ila tahay doorka ay ku yeelan karaan la-dagaalanka iyo ka-hortaga dambiyada nidaamsan sida human trafficking oo kale.

**Qodobka 16aad Farqadiisa 5aad** waxay inooga baahan tahay inaynu aad u cadayno xeer-nidaamiyahan aynu rabno in loo sameeyo ciidanka socdaalka waxa ay tahay inuu daboolo, halkan waxa ku cad anshaxmarinta iyo dalacsiinta ciidanka socdaalka oo kaliya, marka waxaan qabaa inay ku cadaato qoristoodu, inay ku cadaato tababarada, abaalmarinada iyo sida loo bixinayo iyo wax kasta oo tahay inay ku shaqeeyaan iyo sida loo maamulayo ciidanka socdaalku waa inay ku cadaato. Waana in marka la sameeyo ay Gudidda Arrimaha Gudaha u qaabilsan Goluhu ay la ansixiso iyo inuu mabaa'diida guud ee xeerka uu waafaqsan yahay la eegto, taasna oo lagu cadeeyo sidoo kale.

**Qodobka 20aad ee hanaanka anshaxmarinta hogaanka sare**, wa'ayo **saraakiisha sare** waa in la qeexo, mushaharaadka iyo xuquuqaha kale oo dhan madaama ay soo jeedintaydu ahayd inay noqoto qayb ka tisan ciidanka booliiska waxaan qabaa la wadaagaan haday darajo tahay iyo haday xuquuq kale tahay ciidanka booliiska.

**Qodobka 36aad ee Ilaha Dhaqaalaha,** waxay noqonayaan ciidankani ciidan la mid ah ciidanka booliiska, sidaa darteed, illo dhaqaale oo miisaaniyada ka baxsan ma yeelan karaan, ma jirto wax la dhaho kaalmo dawlad dhexe, dawlada dhexe waxa qoondeeya Miisaaniyada oo Golahani leeyahay awoodeeda, marka sabab loo yidhaahdo kaalmay siinaysaa dawlada dhexe iyo dawladaha hoose toona ma jirto, **sidaa darteed, waxaan aaminsanahay in Qodobka 35aad ee Miisaaniyada iyo maamulka xisaabaadku uu ku filan yahay qodobka 36aad gabi ahaan Meesha laga saarol,**

Waxaan doonayaan inaan yar raaciyo baasaboorkan diblomaasiga ah, waxa haboon in inta xaqa u leh qoysaskooduna ay tahay inay la haystaan, laba layn ma kala gali karaan qofka iyo ooridiisa iyo qofka iyo ubadkiisu, ma kala galin karno Madaxweynaha iyo markwada kowaad laba saf oo nidhaahno kana waa diblomaasi kana waa shiciba, markaa waa in aynaan kala reebin.

Mudane Gudoomiye, qodobkayga ugu dambeeya waxa weeye, waxa ka muuqda **Qodobka 33aad** hadada farqadiisa **2aad iyo farqadiisa 3aad** isku akhrido, tan hore waxay leedahay dambiyada ay dadweynaha ka galaan waxa la gaynayaa **maxkadama caadiga civilian court-ka**, halka farqada 3aad sheegayso in **maxkamada ciidamadu** awood u leedahay dhagaysiga dacwadaha ciqaabta ah ee ay galaan, marka hadii ciidanku dambi ciqaab ah ka galo qof shicib ah ma waxa la gaynayaa maxkamada ciidamada, marka waa

in labadaas la kala cadeeyo. Waana in dadku aan duudsiin xuquuqdooda ee ay helaan hanaan sharci ah oo ay kaga dacwoonkaraan wixii gabood-fal ay ciidanka socdaalku gaadhsiiyaan.

Sidoo kale xuduudeena way sahlan tahay soo galideedu, markaa in Iyana xisaabta ku darno oo aynu isku miisaano labadaas, sidaa darteed, mudane Gudoomiye anigoo ayidsan in gudiddu shaqo fiican ka soo qabatay Xeerkan hadana wuxuu inooga baahan yahay akhris 2aad, taasina kama dhigna in shaqo badan aan laga soo qabane, waxa laga soo qabtay shaqo fiican. Waad-mahadsan tihiin.

***Gudoonka.*** **Md. Siciid Mire Faarax (Giire):-** aad buu u mahadsan yahay Mudane Mukhtaar Xasan Maydhane, waan u wada mahad-naqayaa dhamaan mudanayaasha sida ixtiraamka badan dooda uga qayb-qaatay ama fadhiyay, xeerka ilaa 11 mudane ayaa ka doodday, dooddo macquul ah ayaa la soo jeediyay, marka xeerkan oo aad u muhiima iyo iyadoo kal-fadhigan aanay wali waxba inaga bixin, bari ayay dooddu dhamaan doonta ka dib waa la isku soo gurayaa oo waxaanu qiimayn doonaa in loo baahan in gudi loo saaro iyo inaynu cod galino. Fadhigiina sidaas ayuu inoogu xidhan yahay.

## Golihii 5aad Kal-fadhigii 11aad, Fadhigii 9aad

**28 April 2025**

**Quraanka: -** Md. Faysal Yuusuf Jaamac

**Gudoonka: -** Gudoomiye Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Wax ka badelka Xeerka Socdaalka maalinta 3aad

**Md. C/qani Maxamed Aadam (Qaniyo)** (01min, 06ec): - **Qodobka 14aad** ee Xeerka Ciidanka Socdaalka wuxuu sheegaya shuruudaha ciidanka socdaalka, wuxuu sheegayaa oo uu leeyahay waa la xaysiinayaa oo la shaacinayaa, marka qodobkaasi wuxuu ka horimanayaa Qodobka 123aad ee Dastuurka ee mabaa'diida ciidanka qaranka oo sheegaysa in ciidanka qaranku ka koobnaanayo dhamaan gobolada iyo deegaamada Somaliland, hadii marka la xayaysiiyo ama la shaaciyo waxay noqonaysaa in taliyaha ciidanka socdaalka haysta uu haduu doono reerkooda ka wada dhigi karo ciidanka iyo waxa la qorayo, sidaa darteed, waxa qodobkaas loo badelayaa in loo raaco habka uu dastuurku dhigayo.

**Md. Axmad Dayib Aadam (Ku-cadeeye)** (10min, 53 sec): - **marka waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka, Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal Cutubka 1aad Qodobka 1aad ee Magaca Xeerka** Waxaan soo jeedinayaa in magaca Xeerka loo beddalo **XEERKA LAANTA SOCDAALKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND" Isla mar kaana lagu baddelo meelkasta oo ciidanka socdaalku ku yaal xeerkan CIIDANKA LAANTA SOCDAALKA.**

**Qodobka 13aad** ee awoodda iyo waajibaadka ciidanka socdaalka oo ka kooban 6 farqadood, waxaan soo jeedinayaa in loo kala qaado laba qodob oo kala ah sidan:-

**Qodobka 13aad** oo noqonaya waajibaadka laanta socdaalka una dhigan sidan:-

Waajibaadka laanta Socdaalka JSL waxa ka mid ah in ay:

1. Maamulidda iyo Maareynta arrimaha la xidhiidha soo-galidda, ka bixidda, joogista ama degidda dalka Jamhuuriyadda Somaliland si waafaqsan Xeerkan.
2. **Hubinta saxnimada warqadaha ama dukumentiyada qofkasta oo doonaya in uu soo galo ama ka boxo dalka JSL ama doonaya oggolaansho deganaansho rasmi ah ama oggolaansho joogitaan mudeysan.**
3. **Soo saarista iyo hubinta dal-ku-gallada, baasaboorrada, iyo dukumentiyada kale ee socdaalka, ayadoo la hubinayo in dhammaan dukumentiyadaasi ay waafaqsan yihiin shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah.**
4. **Bixinta iyo cusboonaysiinta rukhsadaha (oggolaansho) joogitaanka ama deggenaanshaha iyo baabi'inta oggolaanshaha joogitaanka ama degganaanshaha**

dadka ajaanibta ah ee ku sugan JSL, si waafaqsan Xeerkan iyo hab-raacayada Ciidanka laanta Socdaalka.

5. Oggolaanshaha ama ruqsad-siinta lagu sheegay faqrada 4aad ee qodobkan wuxuu noqon karaa warqad, shaambad ama dhejjis (Sticker) la saarayo dukumentiga safarka, ayadoo shaambadda iyo dhejjisku ay muujinayaan mid ka mid ah noocayada oggolaanshaha la bixiyey.
6. la socodka dadka ajaanibta ah ee ku sugan gudaha Jamhuuriyadda Somaliland, hubinta sharciyadooda, iyo in aysan halis ku ahayn amniga dalka, sidoo kale qaadista tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee ka dhanka ah kuwa ku xad-gudba shuruucda deganaanshaha.
7. Kormeerka iyo ilaalinta xuduudaha dalka laga soo galo (barriga, badda iyo circa) iyo ka hortagga isu-socodka sharci-darrada ah, iyagoo kaashanaya Ciidamadda kala duwan ee dalka.

Qodobka 14aad Awoodaha Ciidanka laanta Socdaalka Somaliland

Awoodaha Ciidanka laanta Socdaalka waxa ka mid ah in ay:

1) Hakinta, haynta iyo dib-u-celinta qof kasta oo ku soo galaya dhulka jamhuuriyadda Somaliland hab sharci darro ah iyo ka qaadista tallaabada sharci ee ku habboon.
2) Joojin iyo xaqiijinta qof kasta oo ay tuhmaan in uu si sharci-darro ah ku joogo dalka, iyagoo Sharciga u raacaya, si waafaqsan Xeerkan iyo Xeerarka kale.
3) Baadhitaan ku sameeyaan dukumentiyada socdaalka iyo aqoonsiga ajaanibta deggan ama joogta dalka JSL.
4) Qabashada iyo xidhitaanka ama masaafurinta qof kasta oo si sharci-darro ah ku jooga dalka, ka dib marka sharciga la waafajiyo.
5) Qabashada iyo baadhitaanada dambiyada la xidhiidha socdaalka, sida tahriibinta dadka ama helitaanka dukumentiyo been abuur ah.
6) Xubnaha Ciidanka Laanta Socdaalku waxay qaadan karaan hub marka ay fulinayaan hawlo Shaqadooda la xidhiidha ayna u arkaan lagama maarmaan.
7) Xubnaha Ciidanku waxay mararka qaarkood adeegsan karaan awood si ay u joojiyaan dadka dalka Sharci darada ku soo galaya.
8) Baadhista iyo hakinta gaadiid kasta (mid badeed, Barri iyo Cireedba) oo ka baxaya ama soo galaya xuduudka JSL haddii ay jirto sabab keeni karta in looga shakiyo ku-xad-gudubka Xeerkan, Xeerarka kale ee dalka ama halbeegyada caalamiga ah ee khuseeya socdaalka.

Sidoo kale waxaan aan soo jeedinayaa Qodob cusub kaas oo ah dambiyada ay galaan ciidanka laanta socdaalka, qodobkaas oo u dhigan sidan

Qodobka ---aad Dambiyada ay galaan ciidanka laanta socdaalku.

1. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka laanta socdaalka ama hawl-wadeenada ciidanka laanta socdaalku wuxuu galayaa dambi ay ka dhalan karto ciqaab, ganaax ama tallaabo anshax-marineed haddii uu:

a) Hakiyo ama celiyo muwaadin Somalilander ah oo sifo sharci ah ku safraya ama ku soo galaya dhulka Jsl ayadoon oggolaansho laga haysan Maxkamad.
b) Fududeeyo socdaal ama safar sharci darro ah.
c) Sii-daayo qof amar xayiraad Maxkamadeed ka yaal ama la saaray.
d) Uu qariyo xog la xidhiidha fal-dambiyeed dhacay ama arrin aan dambi ahayn dambi uga dhigo qof safaraya isaga oo ka faaiideysanaya awoodda xilka uu hayo.
e) Ku-tallaabsado musuq-maasuq iyo anshax-xumo lid ku ah xeerkan, xeerarka kale dalka iyo hab-raacyada iyo siyaasadaha gaarka u ah ciidanka socdaalka JSL.

2. Mar kasta waxa ka reeban xubnaha iyo saraakiisha ciidanka laanta socdaalka geysashada ama ku kicidda dambiyada ku xusan faqradda 1aad iyo dambiyada kale ee ku cad Xeerka Ciqaabta guud ee JSL iyo Xeerarka kale ee dalka inta ay ku guda jiraan gudashada waajibkooda ciidanka socdaalk.
3. Waxa awood u leh dhagaysiga dacwadaha ciqaabta ah ee fal dambiyeedyada ku xusan qodobkan Maxkamadaha ciidamada.

**Qodobka 14aad** ee Xeerka oo ah shuruudaha ku biirista ciidanka socdaalka, waxa aan sixitaan ku sameeyey **faqradda 1aad xarfaha B iyo E** oo aan u Baddeley sidan:
b) qof kasta oo dadiisu ka weyn tahay 15 jir.
e) Maskax ahaan iyo jidh ahaanba badqaba.

**Qodobka 33aad** ee ah waxaan soo jeedinayaa in Nuxurka Farqada 2aad loo badelo sidan ***"Waxa dembiyadda ay sida badheedhka ah uga galaan dadweynaha loo gudbinayaa Maxkamadda Ciidanka, iyadoo loo raacayaa Xeerka Ciqaabta Guud".***

**Qodobka 38aad** ee **awooda ogolaanshaha iyo diidmada soo galda**, nuxurka qodobkaas waxaan soo jeedinayaa in sidan hoose loo badelo anigoo laba qodob oo u kala qaadaya, kuwaas oo kala ah sidan:-

**Qodobka 38aad Awoodda Oggolaanshaha iyo Diidmadda Soo Gelidda Dalka ee Ciidanka Laanta Socdaalka**

Iyadoon waxba loo dhimayn nuxurka uu sheegayo qodobka hore waxay Hawl Wadeenadda Ciidanka laanta Socdaalka iyo Ilaalada Xuduuduhu Awood buuxda u leeyihiin:

**1) Xaqiijinta ujeedada safarka iyo qiimeynta khatarta qofka**

Ciidanka laanta socdaalku waxa uu xaq u leeyahay in uu qof kasta oo dalka soo galaya weydiiyo wax kasta oo uu u arko inay muhiim u tahay waafqasanaanta Sharciga, xaqiijinta iyo qiimeynta codsadaha

**2) Oggolaanshaha Soo Gelidda Dalka**

Ciidanka Laanta Socdaalku waxa uu xaq u leedahay:

b) In uu bixiyo **fiisaha (visa)** dadka ajaanibta ah ee doonaya inay galaan dalka JSL.
t) In uu hubiyo **dukumentiyada safarka** ee muwaadiniinta iyo ajaanibta.
j) In uu xadido muddada joogitaanka ee qof ajnabi ah dalka gudihiisa.

**2. Diidmadda Soo Gelidda Dalka**

Ciidanka laanta Socdaalku waxa uu awood buuxda u leeyay in uu u diido oggolaanshaha qof:

- b) Leh taariikh dambiyeed culus (argagixiso, dambiyo caalami ah, iwm).
- t) Aan haysan dukumentiyo sax ah (baasaboor, fiiso, ama oggolaansho kale).
- j) Loo arko inuu khatar ku yahay **amniga qaranka** ama **badbaadada bulshada**.
- x) Aan ujeeddada safarkiisu caddayn ama doonaya inuu si sharci darro ah ku joogo.

**Qodobka kale isna wuxuu noqonayaa sidan:-**

**Qodobka ---aad Shuruudaha codsiga oggolaanshaha dal-ku-galka.**

Qof kasta oo Ajnebi ah oo doonaya inuu Soo galo dhulka Somaliland, waa in ka hor inta aanu soo galin dalka buuxiyaa Shuruuddahan:-

1) Warqad codsi ah (application form) oo dhammaystiran, laguna muujiyey nooca iyo sababta codsiga.
2) Baasaboor ansax ah oo wakhtigiisa uu ka dhahsantahay ugu yaraan 6bilood. ama dukumenti socdaal oo u dhigma oo uu ku qoran yahay magaciisa oo sax ah oo la siiyay isag..
3) Laba sawir oo kur ah oo u dhigma shuruudaha baasaboorka.
4) Warqad caddeyn ah oo ka socota hay'ad, shirkad ama qof gudaha dalka ah haddii uu ka helay:
   A. Ogolaansho shaqo (work permit) oo ay bixisay wasaaradda shaqada Somaliland.
   B. Warqad martiqaad rasmi ah haddii uu marti u yahay qof ama hay'ad gudaha dalka ah.
   C. Warqad oggolaansho ah oo ka timid jaamacad ama dugsi gudaha JSL.
5) Caddeyn dhaqaale oo muujineysa in uu isbixin karayo codsaduhu mudada ku xusan codsigiisa.
6) Caddeyn caafimaad oo muujinaysa in codsaduhu ka bad qabo xanuunada faafa.
7) Warqadda dambi la'aanta oo aan taariikhda bixinteedu ka badnayn **20** hudohood.
8) Bixinta lacagta codsiga dal-ku-galka oo aan celin lahayn, xitaa haddii loo diido oggolaanshaha.

**Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Qodobka 44aad Farqada 4aad** waa in laga saaro madaama aan Xeerka ku soo kordhiyay shuruudaha codsiga dal kugalka, waayo farqadaasi waxay sheegaysay in Xeer-nidaamiye Wasiirku ku soo saaro loo raacayo shuruudaja dal kugalka.

**Md. Axmed Cabdi Ibraahim (Timo-jilic)** (6min, 25sec): - Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal waad mahadsan tihiin, xeerkani inta badan wuu iska dhamaystiran yahay, marka xeerkan waxa lagu dabaqayaa qofkasta oo ajnabi ah, maadaama qofkasta oo

ajnabi ah lagu dabaqayo waxa loo baahan yahay in Xeerka Maalgashiga iyo Xeerka Qootiga lala akhriyo oo waliba ay la akhriyaan ciidanka fulintu ee socdaalka.

**Qodobka 5aad Farqada 2aad Xarafka A,** waxa ku qoran TAKOOR, marka takoor waa kalmadaha la iska ilaayo dhinaca xuquuqal insaanka, markaa waxay ku haboon tahay takaar la'aan oo aan soo jeedinayaa in halka laga dhigo.

**Qodobka 6aad Farqada 1aad** waxa ku qoran Xeerkan waxa lagu aasaasay, waan fahmi waayay macnaha siduu u yaalo, laakiin halka waxaan leeyahay in laga dhigo "waxa lagu aassaasay baahida iyo mudnaanta shaqada qaranka" sidoo kale **qodobkaas 6aad**, ciidanku **warbixinta** yuu siinayaa? Waa inuu siiyaa Wasaarada Arrimaha Gudaha taasina way inay ku cadahay.

**Qodobka 8aad Xarafka B** Jamhuuriyada Somaliland macne dhan bay samaynaysaa markay ka maqan tahay laakiin lama yaqaan, **Xarafka C** waxaan ku qoran iyo ***shahaadadooda maamul***, ciidanku shaambad kaliya ayuu yeelanayaa waa in laga dhiga **shaambadooda,** had iyo jeer xeer aynu samaynayo dhawr qodob wuxuu u baahan yahay siyaasad (policy), policy-gu wuxuu raba gudi, wuxuu raba wakhtigiisa, wuxuu raba miisaaniyadiisa, Xildhibaanadu budget-ka uu yeelanayo xeerku waa in laga fikiraa, miisaaniyada qaranka inaga samayna oo waynu jaangoynay, lacag aynu meel u dhignay oo aynu samaynay ma jirto, marka iyana waa inay ku jirto qorshaha sannadka dambe oo lagu talagalo. Hadaynu se amar uun bixino oo hadal uun shubno hadhawna la isku wada canaanto oo la yidhaahdo waa la qaban waayay, hebel baa qaban waayay oo hebel baa khaldan way inaga xumaanaysaa oo waynu isku wada dhacaynaa, Miisaaniyadii qaranka inaga gacanta ku hayna, shaqada aynu xeer ku waajibinaa kharash bay u baahan tahay, markaa inaynu sannadka dambe sii qorshaynaa.

**Qodobka 11aad** Dirayska midabkiisa, iminkaba way qaataan, laakiin inamadeenii ITgu way joogaan anigu waxaan rabaa midabka in la soo raaciyo xeerka oo arrin lagama maarmaan ah baan u arkaa oo midabka muuqaalkiisu xeerka uu la socdaa si hadhaw aan loo badeli karin.

**Qodobka 12aad Farqada 1aad** madaama laga hadlayo xidhiidhkii iyo isgaadhsiintii xarumaha, madaama laga hadlayo xogtii, waxaan soo jeedinayaa in lala akhriyo Xeerka Ilaalinta Xogta (Data protection) oo aynu gacanta ku hayno iyo cybersecurity oo ciidan ahaan barashadooda iyo aqoontooda ay lagama maarmaan u tahay iyo sidoo kale amniga internet-ka. Sidoo kale **Farqada 3aad** iyana waxaan ku soo kordhinayaa in kaydka Data protection iyo cybersecurity ayuun baa iyadana ku kordhinayaa.

Soo jeedintii Xildhibaan Shiikh ku-cadeeye laba arrimood uun baan kaga duwanahay dooddiisii inta kale waan ku raacsanahay, da'dda 18 jirka in loo daayo ayaan qabaan, sidoo kale caafimaad qab maskaxeed iyo mid jidheed sax baan u arkaa iyana, sababtoo

ah dee booliska mid indhola' inuu ka mid noqdaa waa muhiim, luuqadan indhoolayaasha ee faraha uun lagu akhriyo ma jirto cid baratay, dabcan markaa lagama reebi karo haduu qofku maskax ahaan caafimaad qabo, sidoo kale luuqada dhagoolayaasha dabcan nin dhagool ah baa loo baahan yahay si dhagoolayaasha dee dacwadooda iyo gartooda iyo arrimohooda qaada oo af-dhagool kula hadla, marka inuu jidh ahaan iyo maskax ahaan caafimaad qabo uun baa muhiima.

Dukumentiyada lagu soo galayo dalka waa baasaboor, travel dukumenti iyo deportation, saddexdaas ma filayo inaynu midna diidayno, waliba waxa ku jira qofka qaxootiga ah ee waraaqo qaxooti sita iyana waa aqbal, marka afartaas dukumenti waa lagama maarmaan in aynu aqbalno. Aad baad u mahadsan tihiin Gudoomiye, Xildhibaano iyo shaqaalaha dhamaantiin.